



## Superintendent Guerrero oo loo magacaabay Golaha Dugsiyada Magaalo Weynta

Dugsiyada Dadweynaha Portland Kormeeraha Guud Guadalupe Guerrero ayaa loo doortay inuu noqdo xubin ka mid ah guddiga fulinta ee Golaha Dugsiyada Magaalo Weynta, oo ah urur waddanka oo dhan ka jira oo ku dadaalaya wanaajinta nidaamyada dugsiyada dadweynaha ee magaalada.

Guddiga sare ee maamulka, oo ay ku jiraan kormeerayaasha guud iyo xubnaha guddiga dugsiyada oo ka kala socda waddanka hareerhiisa, ayaa u doortay Guerrero in uu muddo hal sano ah xilka hayo.

“Waan ku faraxnay in Guadalupe Guerrero ay dadka ay isku dhigmaan u doortaan Guddiga sare ee maamulka,” ayuu sheegay Agaasimaha Golaha Fulinta ee Michael Casserly. “Hoggaankiisa, khibradiisa, iyo waayo-aragnimadiisu waxay noqon doontaa hanti qiime leh inaga oo ku dhex jirna hawsha adag ee siyaasadda waxbarashada federaalka leedahay.”

Iyaga oo ka kooban yahay 70 degmo dugsiyeed oo waaweyn, Golaha Dugsiyada Magaalo Weynta waxay dhiirigeliyaan abuuritaanka dugsiyada magaalada iyo u doodida ardayda iyada oo la marayo sharci iyo cilmi baaris. Goluhu wuxuu sidoo kale bixiyaa nidaam loogu talagalay dugsiyada degmada oo lagu wadaagayo dhibaatooyinka caamka ah si la isku dhaafsado dhaqamada wanaagsan, isla markaana si wadajir ah wax looga qabto dhibaatooyinka cusub marka ay u soo baxaan si waxbarashada ugu wanaagsan ee suurtagalka ah loo siiyo dhallinyarada magaalada. Marka la isku geeyo, Goluhu waxau mataalaan 7.3 malyuun oo arday ah.

“Waxaa sharaf ii ah in aad codkayga ku taageero wada hadalka qaran ee lagu xaqiijinayo in nidaamyadeena dugsiyada dadweynuhu ay yihiin meel xoogan, ammaan ah isla markaana kobcaya,” ayuu sheegay Kormeeraha guud Guerrero. “Waxaan rajeynayaa in aan dhaqamada wanaagsan ee laga kala helayo waddanka oo idil u keeno Portland si loo sii wado dhisida nidaam dugsi oo aan dhammaanteed ku faani karno.”

“Waxaan nasiib u yeelanay in aanu yeelano hoggaamiye qaran ee ixtiraamka ah oo noqdo kormeeraheena guud,” ayay sheegtay Julie Esparza Brown, oo ah guddoomiye ku xigeenka Guddiga Waxbarashada PPS, oo u adeegta Golaha Dugsiyada Magaalo Weynta ee Guddiga Maamulayaasha. “Magacaabistiisa loo magacaabay guddiga fulinta waxay abuuraysaa fursad qiimaha horumar ee muhiimada la siinayo sinnaanta oo ay leedahay Portland loo keenayo wada hadalka dhanka qaranka ee ku saabsan dugsiyada dadweynaha.”

Marka ay mudada halka sano ee ah ee Guerrero ay dhamaato Juun, 30, 2019, wuxuu xaq u yeelan doonaa muddo sadex sano ah oo buuxda isaga oo ka tirsan guddiga fulinta. Guddigu waxay kulanta afar jeer sanadkii.